



Ka Falcalinta dhacdooyinkii Dhacay Janaayo 6deedii: Fariin Ka Imaneysa Guddoomiyaha Waxbarashada PPS Guerrero

Janaayo 7, 2021

Qoysaska Qaaliga ee PPS,

Waxa aan qeyb ka noqonayaan wasaaradaha waxbarashada dadweynaha wadanka ee cambaareynaya weerarkii foosha xumaa ee lagu qaaday shalay Caasimada Wadankeena Maraykan. Rabshadihii weerarka watay ee lagu qaaday Caasimada Maraykan ugu dambeyntii waxa ay noqdeen kuwa fashilmay iyaga oo ahaa kuwa aynu dhammaanteen marag ka ahayn inay ahaayeen kuwa argagax leh, gaar ahaan ardaydeena, inkastoo qof ahaan rajada aan ka qabo wadankeena mustaqbalkiisu iila muuqdo inuu yahay mid lagu soo hirto aadna u wanaagsan.

Haddii aan rabno in aan horseed ka noqono isbedel caafimaad qaba, waa in aan la dagaalano warxumo tashiilka faafinayo wararka aan jirin inaga oo addeegsaneyno aqoon ka dibna taageerna mabaa'diida dimuquraadiyada ee ku dhisan cadaalad. Waxa aan garab taagnahay ardaydayada, qoysaskooda iyo bulshadeena jidkaa wanaagsan ee qof kastaa u marayo mustaqbalka fiican.

Dayrtani, dadaalkii wada jirka ahaa ee lagu taageerayo ardayda, shaqalaaha, iyo qoysaska waxa aan soo saarnay [Xirmo Agabka Kuna Saabsaneyn Doorashadii Madaxweynaha ee 2020](#). Waxaan jecelahay inaan idinku dhiirigalinayaa inaad macluumaadkaasi dib u booqataan, sababta oo ah agabyadaasi waxay ahaayeen kuwa lagu dhiirigalinayo bulshada PPS sidii ay u sii wadi lahaayeen inay si wada jir ah gacmaha isku qabsadaan oo midba midka kale taageero inaga oo is xasuusineyna in awoodii isbedelka lagu sameynayey gacanteena ku jiro iyo waliba sidii aan wax ugu soo kordhin lahayn bulshada ay rabno in aan taageerno.

Marka laga yimaado sawiradii fosoha xumaa ee rabashadaha iyo qalalaasaha watay ee aynu shalay markhaatiga aynu ka ahayn, haddana rajadeyda ku saabsan awooda dimuquraadiyadu waa mid rajo fiican ku galineysa taageerada doorka ay aqoonyahanadeena waxbarashadu ku leeyihiin; waxa sidoo kale run ah in waxbarashadu inay laf-dhabar u tahay dimuquraadiyad kasta. Macallimiintu waxa ay fursad u haystaan sidii ay u taageeri lahaayeen inay ardaydeenu fahmaan dimuquraadiyadeena sidoo kalena ka caawiyaan sidii ay ula socodsiiin lahaayeen dhacdooyinka cusub ee waqtigani dhacaya sidii ay ugu fiirin lahaayeen aqoon hufan iyo natiijooyinkii ka soo baxay doorashooyinka. Waxa aan idinla wadaagayaa agabyo door ah oo shaqaalaha iskuuladu ay la wadaageen ardayda shalayto oo ah dhacdooyinkii shalay dhacay.

Iyada oo sanadkii 2020 ahaa mid ay ina soo mareen caqabado aad u adag, haddana sanadkani cusub ee 2021 wuxuu ku bilaabmay niyad jab, inkastoo aan aaminsanahay inaynu wada jirkeena kaga bixi doono imtixaanada aynu marayno sababtoo ah awooda bulshadeena ee ah in la is taageero.



Guadalupe Guerrero
Guddoomiyaha Waxbarashada (Superintendent)